

Subject: MPS, Ardayda banaan baxaya Ammaanka,iyo Nabadgalyadooda

Qoysaska Sharafta leh ee MPS,

Mudo sadex todobaad ka dib qalbiga waxaa uu la sii murugoonayaa Dhacdadii Parkland, Bulshada Gobolka Florida iyo qoysaskii ku waayey dadkii ay jeclaayeen dhacdadaan toogashada ee ka dhacday Dugsiga sare ee Marjory Stoneman Douglas. Toogashooyinkaas waxay kordhiyeen xiisadaha iyo rabshadaha hanjabaada dugsiga waxay saameyn ku yeeshen dadka wadankeena oo dhan. Anagu waxaan leenahay sharci aan ku sugayno ammaamnka ardaydeena sida ugu macquulsan, dad badan ayaa isweydiinaya wixii kale oo aan sameyn karno.

Dhamaan wadanka oo dhan iyo magaalada Minneapolis, waxay ardaydu si fir-fircoon uga hadlayaan arimaha amniga dugsiga, waxayna abaabulayaan dhowr howlood oo wax looga qabanaayo toogashooyinkii dhacay. Anigu waxaan ku dhiirigalinayaa ardayda dhigata Dugsiyada Dadweynaha Minneapolis ee doorta in ay ka qeyb galaan howlahaas la qaban-qaabiyey ee banaan baxyada ah ay ugu qeybqaadanayaan sida nabad galyada leh,. In ay horay ugu sii wargaliyaan maamulayaasha dugsiyada, Taas oo noo ogolaaneysa in aan la shaqeyno hay'adaha fulinta amniga ee maxaliga si ay u sugaan ammaanka ardayda marka ay ka dareeraan am aka baxaan dugsiga.

Waxaa laga yaabaa in aad aqriday ama aad maqashay, in ay ardayda wadanka oo dhan ay qorsheynayaan in ay ka baxaan dugsiyada mudu 17-daqiiqo oo banaan bax ah, kaas oo ka dhiga halkii daqiiqo hal arday oo ah kuwii lagu dilay dhacdadii toogashada- oo dhaceysa maalinta Arbacada, bisha Maarso 14<sup>eeda</sup>, waxayna bilaabanaysaa saacadu markey tahay 10 aroornimo, taas oo ah bil ka dib maalintii ay ka soo wareegtay dhacdadii toogashada ee murugada laheyd Parkland.

Hadaanu nahay barayaasha, doorkeenu waa in aan ka caawino ardaydeena in ay bartaan sida ugu fir-fircoon ee ay uga qeyb qaadan karaan wadahalada madaniga ee dhexmara iyo muhiimada howlaha nidaamka dimuquraadiyada. Inaga oo tixgalinayna doorka degmadeena oo taageerayna ardaydeena dugsiyada, shaqaalaha iyo bulshada bisha maarso 14<sup>keeda</sup> wixii ka denbeeya waxaan aaminsanahay in ay jiraan wada hadalo lagu dhexhexaadinayo wada hadalada qaran ee hada socda. Ma, aha ficilkaan waxbarasho wanaagsan oo kaliya, laakiin sidoo kale waxay abuurtay meel lagu taageero oo lagu qiimeeyo dareenka bulsho waxbarashada (SEL) kaas oo loogu talo galay ardayda si loo xaliyo dhacdooyinka sidan oo kale ah taas oo macno suubineysa ka hortaga masiibiyinka. Sababtoo ah waxay diirada ugu horeysa saareynaa waxbarashada ardayga, Dugsiyada dadweynaha Minneapolis ma ogolaanayaan banaan bax todobaadle ah ama bil kasta ah, in kasta oo aan siiwadi doono dhiirigalinta ardaydeena si ay u muujiyaan aragtiyadooda iyo fikradahooda.

Sababtoo ah waxaan rumeysanahay dhacdadaan dhaceysa bisha Maarso 14<sup>eeda</sup> inaay siin doonto fursado feejignaan ah oo la maqlayo codkooda kaas oo muhiim u ah howlaha wada sheynta dabiiciga ah, mid kasta oo ka mid ah dugsiyadeena sare waxaa laga codsanayaa in ay la shaqeeyaan hogaamiyeha ardayda si ay u abuuraan howlaha iskaa wax u qabo, kaas oo u ohgolaanaya in shaqaalaha iyo ardaydu u calaamadeeyaan halkii ardayba hal daqiiqo 17-daqiiqo maalintaas. Ardayda ka qeyb qaadanaya howlahaan - **oo aan ka tageynin dhismaha dugsiyada** - waxaa la filaya in ay dib ugu soo laabtaan fasaladooda marka ay dhamaato oo ay saacdu tahay 10:17 a.m.

MPS waxay ixtiraamayaan xaqdastuuriga Ardaydooda oo ay xaq u leeyihiin inay si nabadgalyo leh isku uruursan karaan. Mana ku ciqaabeyno ardayga in laga hor istaago fal-celinada inta ay

mudaaharaadka si nabad u socdo. Habka ugu fiican ee lagu dhowri karo ammaanka ardayga inta lagu jiro maalmaha iskuulka waa in la ogaado meesha uu ardayga joogo—taasna macquul ma ahan marka ay ardaydu ka baxaan dhismaha dugsiyada. Sababtaas awgeed sharcigeena caadiga ah ee ku saabsan xaadirinta ardayga iyo ka qeybgalka banana baxyada waxaa lagu qaadi doonaa ardayga ka baxa dhismaha dugsiyada, ha noqdo banana baxaan ama mid kale.

ugu danbeyntii, qaar ka mid ah qoysaskeena ayaa na weydiiyey ka qeybqaadanayaan ardayda dhigata dugsiyada hoose. Maamulayaasha dugsiyada hoose iyo macalimiinta waxay sameyndoonaan da'da ku haboon oo xamili kara mawduudaan iyo sida ay u xiisaynayaan. Waalidiinta raba in ay ka qeybqaataan howlahaan dugsiyada hoose waxaa lagu dhiiri galinayaa inay la hadlaan maamulaha dugsiyada si loo hubiyo in aan si ula kac ah ardayga loogu gudbin, ama waalidiintooda waxay dareemayaan in uu ilmahu diyaar u aheyn in ay ku waayo arkaan sidan.

Daacadle,

**Ed Graff**  
**Kormeeraha Guudd**